**Warqaddan soo koobista ee Camden wadajirta (Camden Together summary) – Ra'yigaaga ka dhiibo mustaqbalka Camden**

Kani waa iyadoo la soo koobay *Warqadda wadatashiga ee Camden wadajirta (Camden together)*, oo bixinaysa fursad saamayn lagu sameeyo mustaqbalka Camden.

Warqadda gebagebada ah ee *Camden wadajirta (Camden together)* waxay noqon doontaa qorshe loogu talagalay Camden oo sahaminaya sida ay degmadeennu u ekaan doonto sannadka 2012. Inta aannaan qorshahaas go'aan ka gaadhin ayaa waxaannu rabnaa inaannu helno ra'yiga ay qabaan dadka beesha deggan inta ugu badan ee suuragalka ah ee ku saabsan afkaarta aannu hayno.

Soo koobistani waxay tilmaamaysaa waxyaabaha taxaddiyaadka ah ee soo foolsaartay degmada Camden iyo qaar ka mid ah siyaabaha aannu uga dhigi lahayn meel u fiican cid walba. Waxay dejinaysaa qaar ka mid ah arrimaha aannu qaban karno inta u dhaxays imminka iyo 2012 waxay ku waydiinaysaa ra'yigaaga ku saabsan arrimo gaar ah.

Waxaannu rabnaa inay *Camden wadajirta (Camden together)* keento dood nadiif ah oo daacad ah oo ku saabsan arrimaha adag iyo waxyaabaha la kala dooranayo. Waxa kale oo aannu rabnaa inaannu muujinno sida ugu fiican ee looga faa'iidaysan karo imkaaniyaadka xaddidan oo aannu ka fikirno waxyaabaha ay dadka iyo beeluhu qaban karaan si ay Camden uga dhigaan meel fiican, iyo weliba waxa ay qaban karaan adeegyada dadwaynaha iyo ururrada kale.

Fadlan akhri soo koobistan oo ka feker su'aalaha ku qoran. Waxaannu aad ugu farxi lahayn inaannu maqallo ra'yigaaga ku saabsan mid kasta oo ka mid ah arrimahaas saamaynta ku leh mustaqbalka Camden.

Waxa kale oo aannu rajaynaynaa inaad akhrido warqadda oo dhammaystrian, taas oo ku siinaysa xaqiiqooyin badan oo ku saabsan sida ay imminka tahay Camden oo si buuxda kuugu sharraxaysa qaar ka mida doorashooyinka iyo fikradaha. Waxaad ka akhriyi kartaa ama ka soo minguurin kartaa goobta internetka ee ah camdentogether.org.uk ama waxaad koobbi ka dalban kartaa cinwaanka hoose.

Wakhtiga ugu danbaysa ee jawaabaha loo baahanyahay waa **Khamiista 30 November 2006**. Waa in jawaabaha loo soo diraa:

Email: community.strategy@camden.gov.uk

Ama :

Kooxda Istraatiijiyadda Beesha
Community Strategy Team
London Borough of Camden
FREEPOST LON 20084
Room 305, Town Hall
Judd Street
London WC1H 9JE

Waxa kale oo jawaabaha loo soo diri karaa goobta internetka ee cinwaankeedu yahay camdentogether.org.uk

Si aad u hesho soo koobitaanka *Camden wadajirta (Camden together)* oo ku qoran luqaddaada, ku daabacan farta waawayn, ama ku duuban cajeladaha maqalka ama nooca loogu talagalay naafanimad waxbarashada, fadlan nagala soo xidhiidh cinwaanka kore ama telefoonka ah 020 7974 3257, fax 020 7974 6057 ama textlink (textphone / minicom) 020 7974 6866.

## Aragtidayada 2012

**Camden 2012 waa sidan:**

**In la sameeyo fursadaha beesha**
Waxaynu leenahay dhaqaalaha beesha oo aad u fiican kaas oo si fiican ula qabasanaya isbaddelada mustaqbalka, iyo marka ay dad badani gaar ahaan kuwa dhallinta ahi ay heli karaan xirfado iyo waxbarasho, tababaro iyo shaqooyin.

**In bii'adda la tixgeliyo marka horumar la samaynaayo,**
Waxaynu si wada jir ah ugu shaqaynaynaa in meel loo sameeyo mujtamaca kobcaya iyadoo la ilaalinayo bii'addeena iyo tayada nolosheenna. Waxaannu daboolaynaa baahida dadka Camden iminka deggan iyo in la ilaaliyo dhaxalka looga tegayo jiilalka mustaqbalka.

**In la dhiso beelo adag oo caafimaad qaba oo isku xidhan**
dadka reer Camden waxay dareensanyihiin inay gurigoodii joogaan, diimuqraadiyadda ayay door firfircoon ka qaataan waxaanay saameyn ku leeyihiin go'aamada iyaga saameeya.  Tayada nolosha ee cid waliba sare ayay u soo kacaysaa , gaar ahaan caruurta, dhallinta iyo dadka da'da ahba.

**Meel aamin ah oo dhaqdhaqaaq leh kuna taal magaalo caalami ah badhtankeeda.**
Waxaynu qayb wadaag ka nahay London qayb ka mid ah oo hodan ah oo amin ah oo ah albaabbada yurub laga galo halkaas oo ay dhammaan dadka maandaqaddu ka faa'iidaystaan fursadaha fiican ee dhaqanka iyo madadaalada ee inoo dhaw, taas oo ay ku jiraan ciyaaraha olombiga.

Aragtidaas waxa loogu tala galay **qof kasta** oo ku nool, ka shaqeeya ama wax ka barta Camden, da'diisu intay doonto ha le'kaato e maa dhama ay Camden wadajirta (Camden together) ay tahay qorshe mustaqbalka ah, ayaa waxaanu si gaar ah u rabnaa inaannu wax ka qabano baahiyaha iyo walaacyada ay qabaan caruurtu iyo dhallinta, waalidiintooda, daryeelayaashooda iyo qoysaskooda

**Naftaada waydii**
Aragtidu ma tahay mid ay ka muuqdaan waxyaabaha  ahmiyadda u leh dadka ku nool, ka shaqeeya ama ku soo koraya Camden?

Ma jiraan wax laga tegay ama wax aad ka soo horjeeddaa.

## Meeshaanu ka bilabayno - sida ay Camden maanta tahay.

Waa inaynu si fiican u fahanaa meesha aynu ka bilaabayno inta aynaan ka heshiin aragtida mustaqbalka. Waxa halkan lagu soo koobay xaqiiqooyin ku saabsan Camden,

- Dadka Camden deggani waxay sheegayaan inay beeshu isku xidhatahay, tobankii kastana sagaal ayaa qiimeeya degmada dhaqankeeda kala duwan

- Tirada dadka Camden degani way sii kordhayaan, gaar ahaan dhallinta waanay kala duwanyihiin, iyadoo dad badani ay u soo guurayaan xaafadda kana guurayaan sannad kasta.
- Camden waxa ku yaalla meelaha ugu hodansan London iyo meelaha ugu faqiirsan. Marka la isku celceliyana, Camden waa degmada 15aad ee ugu faqiirsan England.
- Baahida loo qabo guryaha la kiraysan karo ayaa shan jeer ka wayn guryaha la hayo.
- Denbiyada la diiwaangeliyay hoos ayay u dhacayaan kalsoonida bilayska lagu qabaana sare ayay u kacaysaa halkan iyo dalka oo dhan, hase yeeshee Camden waxa ka dhaca denbiyada ka dhacda xaafadaha ku yaalla badhtamaha degmooyinka, cabsida laga qabo denbiyaduna waa dhibaato kale.
- Ganacsiga, jaamacadaha iyo cusbataallo mutakhasis ah ayaa soo kordhaya waxa aad u yar meelihii lagu sii ballaadhin lahaa.
- Adeegyada mandaqadda sida gaadiidka, dugsiyada, qalabka dhallinta ayaa si ayay dadka soo kordhayaa miisaan saareen.
- Camden waxa soo foolsaaray dhibaatada caalamiga ah ee bii’adda. Dadka mandaqadda deggan ayaa imminka dibuwershadayn ku sameeya in ka badan celceliska inta dalka laga sameeyo dibu wershadaynta.
- Camden sidii loogu soo baxay footayntii May 2006 waxay ahayd tii ugu badnayd illaa 1994 waxaanay ka sarraysay meelaha kale ee qaranka oo sida loogu soo baxay doorashooyinku ay hoosaysay.
- Dadka deggan Camden, sida kuwa meelaha kale deggan ayay himilooyinkoodu kordhayaan marka la eego tayada nolosha, adeegyada habboon, doorashooyinka iyo sida ay saamaynta ugu leeyihiin waxa mandaqadda ka socda.
- Camden waxa soo foolsaaray khatar kaga imanaysa weerarro argagixiso ah.

## Samaynta fursadaha beesha

### Halka aannu rabno in la gaadho 2012

Waxaynu leenahay dhaqaalaha beesha oo aad u fiican kaas oo si fiican ula qabasanaya isbaddalalada mustaqbalka, iyo marka ay dad badani gaar ahaan kuwa dhallinta ahi ay heli karaan xirfado iyo waxbarasho, tababaro iyo shaqooyin.

### Hawlaha  na horyaalla

Camden waxay leedahay dhaqaale horumaray. In nus ka badan ganacsiyada mandaqadda ku yaallaa waa tijaaradda muxtarifka ah sida iclaamka, dhaqaalaha iyo qaanuunka.  Arrintu si kastab ha ahaatee, tirada meheradaha mandaqadda hoos ayay u dhacday sannadihii dhawaan dad badan oo mandaqadda deggan ayaana shaqo la'.

Dhibaatada muhiimka ahi waa sidi loo kordhin lahaa kobcinta dhaqaalaha Camden si ay uga sii fiicnaato. Taas waxa uu macnaheedu yahay in la hubiyo inay ganacsiyo dheeraad ahi doortaan inay saldhiggooda ka dhigtaan Camden. Waxa kale oo aannu u baahannahay in la hubiyo inay dad kale oo degmada deggani shaqo helaan oo ay ku jiraan sayladda shaqada.

### Waxaannu u sii qaban karno sannadka 2012

- Inaaanu bixinno talo ku saabsan furitaanka meheradda iyo dhisitaanka nashaadyada ganacsiga fiican.
- In qiddaaca xukuumiga ah, oo ah Camden ka ugu badan ee loo shaqeeyo, inuu sameeyo tallaabooyin wax ku ool ah oo ay shaqo gelinayaan shaqaale kala duwan ka soo jeeda beelaha mandaqadda deggan.
- In la bixiyo  tababarro aasaasi ah oo kale, gaar ahaan luqadda ingiriisida iyo weliba tababarrada xirfadaha guud ee nolosha ('life skills') ee dadka ka caawiya inay shaqada qabtaan.
- In dhammaan dugsiyadayada sare la siiyo qalabkii qarniga 21$^{aad}$ oo ay ku jiraan kombuyuutarro (IT) iyo dhismayaasha si dugsiyada loogu dhiso barnaamijyada mustaqbalka.
- In la habeeyo xirfadaha meheradaha mandaqadda si ay u taageeraan dugsiyada iyo dhallinta, gaar ahaan kuwa aan haysan shahaadado muctarif ah.
- In xoogga la saaro taageerada xaafadahayaga ay shaqa la'aantu ku badantahay – In la bixiyo daryeelka carruurta oo la iska bixin karo, iyadoo la bixinayo xirfadaha nolosha, tababar iyo ku dayasho, iyo iyadoo la bixiyo meelo loo maro shaqooyinka, tababarrada iyo waxbarashada  ka bannaan mandaqadda.

- In inta aan la gaadhin ciyaaraha Olambigga ee 2012 la kordhiyo fursadaha shaqada iyo tababarka ee la bixiyo.

**Naftaada waydii**
Warqadda wadatashiga dhammaystiran waxa ku qoran xaqiiqooyin doorashooyin iyo afkaar dheeraad ah.

Sidee ayaad u aragtaa afkaarta kor lagu sheegay ee ku saabsan sidii degmada fursado looga abuuri lahaa?

Halkan waxa ku qoran su'aalo kale oo gaar ah oo laga yaabo inaad jeclaysato inaad ka jawaabto:

- Sidee ayaa loo dhiirri geliyaa ganacsadayaashu si ay u bilaabaan ama ay kobciyaan ganacsiyada mandaqadda?
- Maxaa ay tahay in la qabto si loo soo jiito maalgelin kale oo loo sameeyo dhaqaalah amandaqadda?
- Maxaa looga baahanyahay inuu qidaaca caamka ahi si sidii hore ka duwan u sameeyo sameeyo oo keeni karta kobcinta dhaqaalaha, tusaale ahaan, in shuruudaha laga qaado waxyaabaha ganacsiyada dabraya?
- Haddii aad tahay qof loo shaqeeyo oo deggan Camden, taageero sidee ah ayaad u baahan lahayd si aad uga shaqaysiiso oo aad u tababarto dad kale oo mandaqadda deggan?
- Maxay qaban karaan qidaaca samafalka iyo beeshu si dadku shaqo u helo?
- Sidee ayay dadka looga taageeri karaa inay helaan tababarka xirfadaha iyo luqadda?

**Sheekadii Alison (Alison's story)**

"Haddaan run ahaan u hadlo, u malayn mayo inay Camden fududaynayso si ay dadku ganacsiyo cusub uga furtaan. Waxaan helaa waraaqo badan, waxana jira koorsooyin farabadan. Waxana jirta talo farabadan oo la bixiyo. Waxa jira siminaarro farabadan oo aad tegi karto oo ku saabsan sida loo maamulo ama loo bilaabo ganacsi hase yeeshee waxa loo baahanyahay taageero camali ah. Arrinta keliya ee aan odhan lahaa way fiicantahay waa cashuurta meheradaha ee nalaga khafiifiyay. Taas oo waxtar wayn ii ah sababta oo ah marka aad haysato ganacsi yar, waxaad u baahantahay waa iyadoo lacag lagaa daayo sida kirada ama wax lagaa dhimo, si aad si fiican ugu bilawdo. Waxaan ka shaqaysiiyaa dad deggan degmada Camden. Way sahlantahay in laga shaqaysiiyo dadka mandaqadda sababta oo ah meel fog kama imanayaan, waa arrin camali ah sababta oo ah saacado badan ayaannu halkan ka shaqaynaa. Waxay ila tahay inaad ganacsiyada ku dhiirri gelin karto inay shaqada ku tababaraan dadka mandaqaddan deggan hase yeeshee waa inay noqotaa barnaamij laga soo shaqeeyay – waxa la samayn karaa in ganacsiga lagu sheego mid xirfado bixiya. Haddii aad tahay ganacsi yar wakhti ayaad qofka siinaysaa si aad u barto xirfadaha, hase yeeshee isla markaas taageero lacag la'aan ah ayaad helaysaa."

## In bii'adda la tixgeliyo marka horumar la samaynaayo,

### Halka aannu doonayno inaannu gaadhno 2012

Waxaynu si wada jir ah ugu shaqaynaynaa in meel loo sameeyo mujtamaca kobcaya iyadoo la ilaalinayo bii,addeena iyo tayada nolosheenna. Waxaannu daboolaynaa baahida dadka Camden iminka deggan iyo in la ilaaliyo dhaxalka looga tegayo jiilalka mustaqbalka.

### Hawlaha  na horyaalla

Sannadaha soo socda waxa kordhaya dadka deggan degmada Camden waxaanaannu rajaynaynaa  inuu dhaqaaluhu sii kordho. Isbeddelladaasi waxay keeni doonaan inay miisaan dheeraad ah ku siyaadiyaan bii'adda, adeegyadayada caamka ah iyo habka aannu u isticmaallo barxadahayaga

Waxaannu filaynaa inay kordhaan gawaadhida, isticmaalka tamarta iyo Baahida loo qabo guryaha la qoynka. Waxa kale oo aannu ognahay inay dadku leeyihiin mudnaano kala duwan – dadka qaarkood, ayaa tusaale ahaan, ku raaxaysta cawayska habeenkii halka ay qaar kalena rabaan nolol deggan, barxado bannaan.

Dhibaatooyinka na haysta waa inaanu isu miisaanno,si aanu u sare ugu soo qaadno tayada nolosha ee imminka jirta isla markaasna ka fekerno baahiyaha jiilalka mustaqbalka . waxaynu u baahanahay inaynu raadino sidaynu u taageerilahayn dadka soo badanaya iyo dhaqaalahaba iyadoo isla markaas aannu ilaalinayno bii'addayada oo aannu abuurayno beelo ay dadku ku noolaadaan kana shaqeeyaan imminka iyo mustaqbalkaba.

### Waxaannu u sii qaban karno sannadka 2012

In Camden laga dhigo 'meel uu hooseeyo kaarboonka ka soo baxaa':

- In la hubiyo inay dhismayaasha cusubi noqdaan qaar madhxiya tamarta.
- In dadka lagu dhiirrigeliyo inay inay socdaan oo ay raacaan gaadiidka dadwaynaha.
- In la Sameeyo dibu wershadayn dheeraad ah loona sameeyo hab fiican oo dhima tamarta la isticmaalo.
- In la isticmaalo baabuurro tamarta madhxiya iyo habab ay ka mid yihiin saqafka la dahaadho.

In horumarin lagu sameeyo tayada  dhulka dhisan:

- In la hirgeliyo heerka dhisaynka oo fiican si loo hubiyo isku cufku keeno tayo sarraysa oo la jaanqaadda agagaarka.
- In kawnsalka awoodihiisa qorshaynta iyo ahaanta uu yahay cidda leh guyaha ijtimaaciga ah in loo isticmaalo in lagu taageero heerarka bii'adda, sida, sida isticmaalka baytariyada ku shaqeeya cadceedda.

- In la hubiyo in dhismayaasha cusub loo qaabeeyo hab dhima denbiyada, asluubxumada ijtimaaciga ah oo keenta adeeg guud oo fiican iyo waxyaabaha horumarka aasaasiga u ah (infrastructure).

In hantida beesha si fiican loo isticmaalo:

- In horumarin lagu sameeyo sida loo isticmaalayo meelaha furan oo ay ku jiraan waddiiqooyinka la maro.
- In la helo habab barxadaha iyo meelaha aan imminka sida fiican loo isticmaalin mustaqbalka loogu isticmaali lahaa inay dadka u adeegaan.
- In guryo, xafiisyo iyo dhismayaal badan oo aan imminka la isticmaalin dib loo isticmaalo.

**Naftaada waydii**

Warqadda wadatashiga dhammaystiran waxa ku qoran xaqiiqooyin doorashooyin iyo afkaar dheeraad ah.

Maxaad u aragtaa afkaarta kor lagu soo sheegay ee ku saabsan bii'adda iyo in koritaanka lagu miisaamo tayada nolosha?

Halkan waxa ku qoran su'aalo kale oo gaar ah oo laga yaabo inaad jeclaysato inaad ka jawaabto:

- Sidaad u malaynaysaa inay tahay sida ugu fiican ee la isu waafajiyo danaha kala duwan ee Camden?
- Maxaad qaban lahayd si mandaqadaheenna baarkinka uga dhigto meelo dadku jeclaadaan oo waxtar leh?
- Miyay jiraan siyaabo aannu dadka u siin karno waxyaabo soo jiita, tusaale ahaan, in dibu wershadayn la sameeyo ama wax laga qabto isbeddelka cimilada? Ama laga fiirsado in tallaabo laga qaado arrimahaas, Tusaale ahaan , kuwa qashinka daadiyo ama aan dibuwershadaynta samayn?

**Sheekadii Sandra (Sandra's story)**

"Waxaan ku soo koray Swiss Cottage waxaanaan ku noolaa halkan 20kii sannadood ee la soo dhaafay. Kuma noolaadeen meel kale. Waa taas sababta aan mandaqadda u ilaalinayaa. Waddooyinka dhex mara meelaha la degganyahay ayaa qurux badan, hase yeeshee in sidaas lagu ilaaliyaa waa arrin hawl u baahan. Dadku ma daryeelaan dhirtooda iyo geedaha wax lagu dayro, sidaa darteedna qusayntoodii ayaa dhibaato ah. Qaar kale ayaa beertoodii hore u beddela baarkin ay gaadhiga dhigtaan, kuwaas oo keena daadad dhib keena. Gurigayagii dabaqa hoose ku yaallay ayaa biyo ku soo fataheen taas oo keentay inaannu dib ugu guuri kari wayn muddo 18 bilood ah. Kharbudaadda la sameeyaa waxay dhiirri gelisaa kharbudaad kale. Qof walba waxa looga baahanyahay inuu bii'addeenna daryeelo. Wiiggii laba jeer ayaa nalaga qaadaa qashinka sanduuqyada dibu wershadaynta ee jaraa'idka quraaradaha iyo culbadaha – taasina waa arrin aad u fiican, oo ay hirgeliso dawladda iyo kuwa kale, dadka kuma khasbi kartid inay isbeddel sameeyaan. Waa inay iyaga ka timaaddaa rabitaanka inay sameeyaan taasina waa arrin dhib leh."

## In la dhiso beelo adag oo caafimaad qaba oo isku xidhan

### Meeshaannu rabno inaannu gaadhno 2012

Dadka reer Camden waxay dareensanyihiin inay gurigoodii joogaan, diimuqraadiyadda ayay door firfircoon ka qaataan waxaanay saameyn ku leeyihiin go,aamada iyaga saameeya. Tayada nolosha ee cid waliba sare ayay u soo kacaysaa , gaar ahaan caruurta, dhallinta iyo dadka da'da ahba.

### Hawlaha na horyaalla

Dadka deggan Camden waxay u kala duwanyihiin siyaabo badan – isirka, qawmiyadda, luqadda, diinta, da'da, lab/dhaddig, dabaqadda ijtimaaciga ah, miyuulka jinsiga ah. Waxa dhammaanteen innaga dhexeeyaa waa inaynu ku noolaanno oo ka shaqayno meel aynu gurigeenni u ictibaarinno.

Waxaynu u baahannahay in la hubiyo inay dadku helaan fursado ay ku hore mariyaan tayada noloshooda , inaannu la xidhiidhno dad ay kala duwantahay khalfiyaadkoodu oo aynu door firfircoon kaga ciyaarno beesheenna iyo diimuqraadiyadda. Waxa kale oo aynu u baahannahay inaynu horumarin ku samayno caafimaadka dadka oo la dhimo sinnaan la'aanta dhinaca caafimaadka ee degmada ka jirta.

Camden waxay ahaan doontaa meel dadkeedu dhallin u badanyahay. Dadkana cimrigoodu wuu sii dheeraanayaa dadka da'da ahina waxay rabaan inay madax bannaanaadaan oo ay firfircoonaadaan muddda ugu dheer ee suuragalka ah. Waxa na haysata hawl ah sidii loo dabooli lahaa baahida isbeddelaysa ee dadka degmada oo ay ku jiraan dhallinta iyo dadka da'da ah.

### Waxaannu u sii qaban karno sannadka 2012

Dhisitaanka beelo adag oo  firfircoon:

- In la hubiyo inay meelaha caamka ahi noqdaan qaar si fiican loo qaabeeyay oo ay dadku gurigoodi oo kale dareemaan.
- In beesha laga qayb geliyo in dhibaatooyinka deegaanka si wadajir ah loo xallilo.
- In qiimeeyo kala duwanaanshaheenna oo aynu samayno 'dareen mandaqadda ku saabsan' iyadoo mandaqadda laga qabanayo dabbaaldegyo iyo dhacdooyin.
- In la sameeyo golayaal laga hirgeliyo mandaqadaha Camden, halkaas oo dadka reer Camden ay ka dhiiban karaan codkooda ku saabsan adeegyada mandaqadda iyo go'aannada iyaga saamaynta ku leh.

In la dhiirrigeliyo caafimaadka wanaagsan ee dhammaan dadka:

- In hantida lagu waajaho meelaha iyo kooxaha dadka caafimaadkoodu xunyahay.

- In dadka kala duwan loo isticmaalo inay bixiyaan macluumaadka ku saabsan caafimaadka sida shaqaalaha jooga xarumaha waxbarashada.

Horumarinta nolosha dhallinta iyo dadka da'da ah:

- In la sameeyo kilaabyada la tago marka dugsiga laga soo rawaxo iyo xarumaha carruurta.
- In la sahamiyo dhammaan doorashooyinka furan si hab habboon wax loogaga qabto siday ugu fillaan karaan ama ugu habboonaan karaan dugsiyada sare iyo boosaska dugsiyada laga bixiyaa.
- In la hubiyo inay afkaarta  carruurta, dhallinta, waalidiintooda iyo daryeelayaashoodu ay saamayn ku yeeshaan adeegyada ay isticmaalaan.
- In la hubiyo inay dadka da'da ahi guryahooda ku noolaadaan inta ay kari karaan oo ay nashaadyada iyo fursadaha si dadka kale la siman u helaan iyaga oo beeshooda dhex jooga.

**Naftaada waydii**

Warqadda wadatashiga  dhammaystiran waxa ku qoran xaqiiqooyin doorashooyin iyo afkaar dheeraad ah.

Sidaad u aragtaa afkaarta kor lagu soo sheegay ee ku saabsan samaynta beelo xooggan oo caafimaad qaba oo isku xidhan?

Halkan waxa ku qoran su'aalo kale oo gaar ah oo laga yaabo inaad jeclaysato inaad ka jawaabto::

- Maxaa idinka caawin kara adiga  ama dadka kale ee aad taqaanno inaydun Camden u dareentaan sidii gurigiinnii?

- Maxaa adiga iyo dadka aad taqaanno idinku xiisagelin kara inaydun door firfircoon ka qaadataan beesha mandaqaddiinna?

- Maxaa kugu dhiirrigelin kara inaad firfircoonaato, oo si caafimaad leh u noolaaato oo naftaada si fiican u daryeesho?

- Sidee ayaannu waalidiinta ugu taageeri karnaa hab fiican, gaar ahaan wakhtiyada ay baahanyihiin sida, wakhtiga dhibtu hayso qoyska iyo sannadaha baaluqa (teenage years)?

- Sidee ayaannu u horemain karnaa nolosha dadka da'da ee qoqoban ee beesha ugu dhex nool madaxbannaanida?

**Sheekadii Malik (Malik's story)**

"Waxa jira wax badan oo aynu qaban karno haddii aynu wadajir u shaqayno oo aynu afkaarta is waydaarsanno. Waa inaynu yeelannaa kilaabyo dheeraad ah oo la tago, halkaas oo lagu kulmi karo oo isdhexgal ijtimaaci ah ay ka heli kaaan dadka ay dhaqammadoodu kala duwanyihiin ee khalfiyaadkoodu kala geddisanyihiin – taasi waxay gacan ka gaysanaysaa isfahamka waxaanay dhimaysaa dhibaatooyin farabadan. Waxaan rabaa inaan qof walba wejigiisa farxad ka arko. Aniga iyo xaaskaygu waxaannu tegi jirnay meel ay ku kulmaan dadka ka wayn 50 jirku taas oo ku taallay meeshii aannu ku noolaan jirnay. Saaxiibbo ayaannu samaysannay, waannu kaftami jirnay, waxaanaannu iswaydaarsan jirnay afkaarta. Waa in meelaha noo dhaw arrimahaas oo kale laga hirgeliyaa. Imminka waxaannu aad u tagnaa laybareeriga nagu dhaw. Intaannu fadhiisanno ayaannu wax akhrisannaa oo aannu isticmaalnaa makhaayadda. Waxaan tagaa koorsooyinka IT ee ka socda laybareeriga. Intii aanan bilaabin kombuyuutarrada hore waxba ugamaan aqoon. Waxaan bartay sida loo diro loona helo emailka, sida loo isticmaalo internetka, sida loo isticmaalo messenger ee loola hadlo qaraabada dalal kale ku nool, sida loo isticmaalo maykarofoonka iyo kamaradda. Habeen hore waxaan la hadlaayay carruurtii aan awowga u ahaa ee joogtay qaahira".

## Meel aamin ah oo dhaqdhaqaaq leh kuna taal magaalo caalami ah badhtankeeda.

**Meeshaannu rabno inaannu gaadhno 2012**
Waxaynu qayb wadaag ka nahay London qayb hodan ah oo amin ah oo ah albaabbada yurub laga galo halkaas oo ay dhammaan dadka maandaqaddu ka faa'iidaystaan fursadaha fiican ee dhaqanka iyo madadaalada ee inoo dhaw, taas oo ay ku jiraan ciyaaraha olombiga

**Hawlaha na horyaalla**

Camden waa meel aad u kala duwan. Waxay caan ku tahay meelaha caanka ah sida Hampstead Heath, laybareeriga Britishka (British Library) iyo suuqa Camden waxa kale oo ay leedahay meelo badan oo la degganyahay iyo suuqyo yaryar. Degmadu waxay leedahay barxado meelo badan oo cagaaran oo furan waxa kale o oay leedahay nolol firfircoon oo dhaqanka ah, meelaha cawayska iyo fanka.

Cabsida ay dadku ka qabaan denbiyada ayaa sarraysa, xataa iyadoo ay heerka denbiyadu hoos u dhaceen. Dad badan oo ay ku jiraan dhallintu, ayaa ka werwersan asluubxumada ijtimaaciga ah. Hawl wayn oo na sugaysa weeye sidii Camden looga dhigi lahaa meel aamin ah.

Marka la gaadho 2012 carrada yurub waxa lagu gaadhi karaa laba saacadood gudahood marka tarreenka Eurostar laga raaco istaanka tareennada St Pancras International. Hawl kale waxay noqon doontaa sidii raaxo iyo faa'iido looga heli lahaa olambigiska iyo Paralympics 2012.

**Waxaannu u sii qaban karno sannadka 2012**

In cid waliba ka qayb qaadato sidii Camden looga dhigi lahaa meel aamin ah:
- In dadka lagu dhiirrigeliyo inay mas'uul ka noqdaan asluubtooda iyo asluubta carruurtooda.
- In saamayn lagu go'aammada ku saabsan sida mudnaanta loo kala siiyo kharashka wax lagaga qabanayo denbiyada.

Sida ugu badan in looga faa'iidaysto beeraha Camden iyo barxadaha furan:
- Hagaajinta meelaha nashaadyada dhallinta, xadaynta eyda, kordhinta saacadaha furitaanka xilliga xagaaga iyo hagaajinta nidaamka boodhadka la tilmaansado.
- Hagaajinta laydhinta, iyo makhaayadaha si beeraha loo isticmaali karo galbihii.

Sida ugu badan in looga faa'iidaysto tharwaddayda dhaqanka ah:
- In la hubiyo inay dhammaan beelaha Camden deggani ay helaan oo lagu dhiirri geliyo inay samaystaan dhacdooyinka dhaqanka iyo nashaadyada kale ee la bixiyo

In la hubiyo sidii raaxo iyo faa'iido looga heli lahaa olambigiska iyo 2012.

- In la dhiirrigeliyo isticmaalka meelaha isboortiga isboortiga iyo madadaalada ee hore u sii jiray, gaar ahaan dadka naafada ah, dadka naafada ah iyo dadka deegaanka ee madaw iyo aqalliyaadka.
- In la dhiirrigeliyo mutadawacnimada taageerista nashaadyada isboortiga iyo in gacan laga gaysto ciyaaraha olombiga naftooda.

**Naftaada waydii**
Warqadda wadatashiga  dhammaystiran waxa ku qoran xaqiiqooyin, doorashooyin iyo afkaar dheeraad ah.

Sidaad u aragtaa afkaarta kor lagu soo sheegay ee ku saabsan Camden inay noqoto meel fiican oo ku taalla badhtamaha magaalo caalami ah?

Halkan waxa ku qoran su'aalo kale oo gaar ah oo laga yaabo inaad jeclaysato inaad ka jawaabto::

- Sidee ayay dugsiyada, afraadda, kooxaha beelaha, jaarka iyo meheraduhu gacan uga gaysan karaan dhiirrigelinta ixtiraamka oo ay uga hortegi lahaayeen denbiyada iyo asluubxumada ijtimaaciga ah?

- Maxaa gacan ka gaysan kara dhimitaanka cabsida laga qabo denbiyada oo kordhin kara niyad samidaada?

- Miyaannu dhiirrigelinnaa makhaayadaha iyo dhacdooyinka lagu beeraha oo isticmaalkaas lacag laga qaadaa si ay ugu maalgeliyaan horumarinta qalabka ay bixiyaan?

- Sidee ayaannu dad badan oo deggan Camden ugu sahli karnaa inay ku raaxaystaan nashaadyada dhaqanka ah ee degmada laga helo?

- Maxaad ku jeceshahay Olombiga? Maxaad ka werwersantahay?

**Sheekadii Aron (Aron's story)**

"waxaan jecelahay inaan kubbadda cagta ku ciyaaro Camden Sunday league. Waxaan ku ciyaari jiray dugsiga. Dugsigaygu dhab ahaantii wuxuu ku fiicnaa isboortiga. Maamulahayaga ayaa firfircoonayd – waxay noo diri jirtay inaannu hawlo samafal samayno dhammaan carruurtuna way jeclaayeen. Waxay ila tahay inay wakhtigan dadka dhallinta ahi fursado badan u haystaan inay ka qayb qaataan isboortiga sababta oo ah horumarinta isboortiga ayaa sare u soo kacay dhawrkii sano ee la soo dhaafay. Olambiguna wuxuu keenayaa fursad lagu sii dhiirrigeliyo [isboortiga]. Arrinta ugu fiican ee ku saabsan nolosha Camden waa in dhammaan qaybaha nolosha halkan la isugu keeno. Sida suuqa la qabto maalmaha fasaxa. Jawi fiican ayaa halkaas ka jira – waxa halkaas yimaadda jinsiyad kasta. Lacagtaas la helayana waxbay ku qabtaan. Waxay ila tahay inay debiyadu ka sii darayaan, gaar ahaan guryaha la jabsado iyo arrimaha la midka ah. Taasna waxa sabab u ah dadka oo aan la siin fursado ku filan oo ay meel ku tagaan ama ku sameeyaan wax kale. Haddii aan Camden wax ka beddeli karo, waxaan samayn lahaa waxyaabo dheeraad ah oo ay dadka dhallintu sameeyaan, sida kilaabyada dhallinta ee laga helo tababarka aasaasiga ah ee barnaamijka nijaaradda ee King's Cross."